

Wajiga Hore ee Dhaqan Gelinta ee Early Achievers

Su'aal: Goorma ayaa wajiga dhaqan gelinta hore la bilaabanayaa?

Jawaab: Cultivate Learning ayaa bilaabi doonta la xariirida ka qaybgalayaasha bisha Luuliyo 15. DCYF waxay ku shaqaynaysaa jadwalka dhaqan gelinta guud ee gobalka ee hanaanka la muraajaceeyay ee Early Achievers waxayna xog dheeraad ah ka bixinaysaa marka aan hayno faahfaahin gaar ah oon idin la wadaagno.

Su'aal: Waa maxay faa'iidooyinka ka qaybgalka wajiga hore ee dhaqan gelinta?

Jawaab: Markaad ka qaybgasho wajiga hore ee dhaqan gelinta, waxaad fursad u helaysaa inaad billoowdo shaqada aqoonsiga tayada ee la muraajaceeyay xili ka horaysa ka qaybgalayaasha kale ee gobalka. Waxaad sidoo kale fikir ka dhiibanaysaa hanaanka cusub intaad helayso taageerada tooska ah ee ay bixinayso Cultivate Learning.

Su'aal: Qofkee ayaa lala xariirayaa si uu uga qaybgalo wajiga dhaqan gelinta hore?

Jawaab: Ugu yaraan 100 barnaamij oo marhoraba safka ku jiray ayaa lala xariiri doonaa ayadoo lagu bilaabaayo barnaamijyada horay loogu mudeeyay xog aruurinta ee Qaybaha 3, ayadoo sidaan la iskugu xijinaayo: dib u qiimaynta, billoowyada, aasaaska, ayadoo sidoo kalana la tixgelinaayo kala duwanaanshaha nooca, luuqada, iyo helitaanka tignooloojiyada ee barnaamijka. Haddii aanaan gaarin 100 barnaamij oo ka socda Qaybaha 3 aad, waxaan u gudbi doonaa barnaamijyada horay loo mudeeyay ee Qaybaha 4 anagoo raacayna isla hanaanka.

Su'aal: Goorma ayaa lala xariirayaa ka qaybgalayaasha?

Jawaab: Shaqaalaha ka socda Cultivate Learning ayaa bilaabi doona la xariirida ka qaybgalayaasha bisha Luuliyo 15.

Su'aal: Maxaa dhici doona talaabada xigta?

Jawaab: Dhex-dhexaadiyaha Bulshada ayaa kulasoo xariiri doona asagoo kuu sheegaaya fursad aad uga qaybgeli karto wajiga hore ee dhaqan gelinta. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho, Dhex-dhexaadiyaha Bulshada ayaa kaala shaqayn doona go'aaminta taageero kasta ood u baahan tahay kaana caawin doona dhamaystirka Aqoonsiga Barnaamijka. Haddii aadan doonayn inaan ka qaybgasho wajiga hore ee dhaqan gelinta, waxaad kusii jiri doontaa safka waxaana lagulasoo xariiri doonaa markale marka la samaynaayo dhaqan gelinta gobalka oo dhan.

Su'aal: Waa maxay Aqoonsiga Barnaamijka?

Jawaab: Aqoonsiga Barnaamijku waa taxanayaasha waraysiyo markaad waqti u hesho ah oo laga qaadaayo hogaamiyaasha Barnaamijka Waxbarashada Dhallaanka iyo Ilmaha Da'da dugsiga, hogaanka macalimiinta, iyo qoysaska. Kadib waraysiyada, ka qaybgalayaasha ayaa heli doona warbixin aqoonsanaysa awoodaha iyo muhiimadaha barnaamijkaaga gaarka ah waxaana lala adeegsan karaa



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taariikhdiis hore: Juun 24, 2021

U qalmida iyo Taageerooyinka Adeeg Bixiyaha | Waxaa Qaybinta u Fasaxay Rachael Brown-Kendall, Maamulaha QRIS

tababar si loo taageero hormarinta tayada. Waa talaabada koobaad ee hanaanka Aqoonsiga Tayada ee cusub dhammaan ka qaybgalayaashuna waxay ku bilaabi doonaan Aqoonsiga Barnaamijka.

Su'aal: Sidee ayay ka qaybgalka wajiga hore ee dhaqan gelintu u saamaynaysaa jadwalkayga?

Jawaab: Jadwalkaaga Early Achievers ayaan isbadeli doonin haddii aad ka qaybgasho iyo hadii kalaba wajiga hore ee dhaqan gelinta. Su'aalaha gaarka u ah jadwalka, fadlan la xariir DCYF oo aad ka helayso QRIS@dcyf.wa.gov.

Su'aal: Waa maxay taageerooyinka tignooloojiyada ee aan heli doono?

Jawaab: Dhex-dhexaadiyaasha Bulshada oo kaashanaaya tababarayaal ayaa bixin doona taageero gaar ah oo ku aadan helitaanka Saaxiibka Tababarka (oo dhawaan loogu yeeri doono Hanaanka Wada Shaqaynta Macalinka Tababarka, Coach Educator Collaborative Interface, ama CeCi) iyo buuxinta Aqoonsiga Barnaamijka. Waraysiyada Aqoonsiga Barnaamijka waxa lagu samayn doonaa xog aruurinta oonleenka ah ama taleefanka lagu samayn doono. Taageerada waxaa lagu heli karaa luuqado badan.

Su'aal: Ma u baahan nahay koonto aan ka furto Saaxiibka Tababarka (CeCi)?

Jawaab: Haa, Dhex-dhexaadiyaha Bulshada iyo/ama tababare ayaa kaa caawin kara bilaabida kuguna xiri kara khayraadka.

Su'aal: Sidee ayaan u diyaar garoobi karaa?

Jawaab: Siiwad kala shaqaynta tababarahaaga higsiyada horay kuugu degsanaa. Hel xogtii ugu danbaysay adoo booqanaaya webseedka Hormarinta Tayada ee Joogtada ah ee Early Achievers ka DCYF: <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/early-achievers/cqi>.